# TAXANAHA DHAXALREEB I/2008

Maarj 2008 Ponte Invisibile Ed.

# *Raad ka mid ah raadadkii addoonsiga*



**Xasan C Madar**

**Xuquuqda qoraalkan oo dhammi waxay u dhawran tahay qoraaga kor ku magacaaban oo laga xidhiidhi nabaadiino@yahoo.com.**

PONTE INVISIBILE

Buug elektrooniggan waxaa daabacday Ponte Invisibile Edizioni, REDSEA-ONLINE Publishing Group
Maarj 2008 – daabaciddii 1aad - Pisa

Taxanaha *Dhaxalreeb*:

[1] Jama Musse Jama, Juun 2005
*Layli Robot: Makiinad iswadda oo ciyaarta Layli Goobalay.*

[2] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo' iyo Mohamoud H. Nugidoon, Noofember 2005
*Qalabka iyo Suugaanta Qodaalka.*

[3] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Diisember 2005
*Mahadhadii Muuse Xaaji Ismaaciil Galaal.*

[4] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Jeenarweri 2006
*Kumaa ah Aabbaha Miisaanka Maansada Soomaaliyeed: ma Carraale mise Gaarriye?*

[5] Jama Musse Jama, Abriil 2007
*Tirada iyo habka tirsiimo ee Afsoomaaliga.*

[6] Cabdiraxmaan Faarax 'Barwaaqo', Meey 2007
*Miisaanku waa furaha kala asooridda badaha maansooyinka soomaaliyeed.*

[7] Ibraahin Yuusuf Axmed "Hawd", Juun 2007
*"Dhulgariir" waa digniin culus*

[8] Khaalid Jaamac Qodax, Oktoober 2007
Suugaan Xul ah iyo Abwaan Axmed Aw-geedi "Dheeraad"
Maansoyahan mudh baxay!

[9] Xasan C. Madar, Maarj 2008
Raad ka mid ah raadadkii addoonsiga.

Taxanaha *Dhaxalreeb* waa qoraallo aan kalgal sugan lahayn oo sannadkiiba dhowr jeer kasoo baxa degelka redsea-online.com. Waxaa isku dubbarida qoraalladaas Jama Musse Jama, waxaana daabacda shirkadda buugaagta soo saarta ee Ponte Invisibile Ed. ee saldhiggeedu yahay Pisa, Italy.

Bilaash kaga soo rogo degelka www.redsea-online.com/e-books.

**HORDHAC:**

Marka dad ama ummad aad taariikhdooda taqaan waad garan kartaa waxa aad ka filan karto is yeelyeelkoodana waad dareemi kartaa inuu yahay shirqool hadoodilan, wanaag kasta oo ay soo bandhigaanna yahay dhuxul dambas huwan. Qof kasta oo akhriyey buugga Xididdo: qiso qoys Ameerikaan ah ama daawaday filinka laga sameeyey wuxu garan karaa nooca dadka maanta iskaga keen dhiga kuwo u heellan ilaalinta xuquuqul insaanka iyagoo u adeegsada qalab ay ku hirgeliyaan fikirkooda gumaysiga cusub oo ay ka dhigtaan hub ay kaga aargoostaan cid kasta oo ay u arkaan ujeeddadooda inay halis ku tahay.

Haddii aad tagto Afrikada galbeed ha ka soo noqon adoon tegin dalka Gaana, haddii aad Gaana tagtana ha ka soo laaban adoon booqan guriga qalcadda weyn ah ee ku yaal xeebta badweynta Atlaantika ee loo yaqaan Elmina Castle(Elmiina kastel).

Gaana oo ah waddankii ugu horreeyay Afrikada madow ee madxbannaani ka qaata gumaysigii reer yurub ee haddana ugu hor wareegay gumaysiga nooca cusub, waa meelaha ugu waaweyn ee sida muuqata uu uga hirgalay addoonsigii dadka , waxana weli ka sii muuqda raadadkii uu kaga tegay ganacsigii addoonsigu.

Haddaba waa maxay Elmina Castle? maxaynu ka baran karnaa?. Waa dhisme qalcad ah oo uu dhisay Boortuqiisku sannadkii1482. Waa waa qalcadda ugu da' weyn ee jirta ee ka taagan ganacsigii addoonsiga ee badweynta Atlaantika. Waxa maanta u soo daawasho taga boqollaal qof oo madow iyo caddaanba leh, ha u badnaadeen dadkii qarniyaal ka hor awoowayaashood halkan markab lagaga qaaday iyagoo silsiladaysan si ay u noqdaan xoogga wax soo saar ee dhaqaalaha Ameerikadii cusbayd iyo warshadihii Yurub ee ilaa maanta ay salka ku hayaan dhaqaalaha iyo xadaaradda reer galbeedku.

Dadka madow ee dhismahan Elmina Castle soo booqdaa waxay ka siman yihiin oohin iyo xusuus murugo huwan inkastoo aan la garanayn inta xusuustaasi qalbigooda ku sii jiri doonto, waxa ay u kordhin karto iyo waxa ay ka korodhsan karaan.



*(muuqaalka Elmina Castle)*

Anigu maalintii ugu horraysay ee aan booqdo oo ahayd bishii July 2005 inkastoo asxaabtii Afrikaanka ahayd ee ila socotay ay baroor afka isku dareen oo aan ilmo indhahooda ku hubo, aniga wax oohin ahi igama iman, garan maayo sababta, malaha waxa iigu wacan dhaqanka qallafsan ee reer guuraannimo ee soomaalida ee aan jixinjixa aqoon ee oohinta raggu ay liidnimo tahay, hase ahaatee sidaa ay tahay murugadu iguma yarayn. Waan arkayey meeshu siday u ekayd. Xusuus isbeddeshay bay ahaydoo saacad ka hor waxannu ka soo laabannay seeraha dalxiiska ee Kakuma Park oo ay ku taal buundada lulata ee 35ka mitir ah ee magaalada Cape Coast oo aan sidaa uga fogayn Elmina. Waxan eegay labadii qof ee wax caddaan reer Yurub ah nala socday bal inay iyana ilmaynayaan. Waxan ku fikiray inay fiican tahay in qof kasta oo caddaan ah oo meeshan soo booqda lagu xidho hal habeen oo gogol iyo cunto la'aan ah bal inuu dareemo waxa awoowyaashii dad badeen.

Intaan ku jiray daawashada iyo wax ka barashada Elmina Castle, xusuuso badan baa maskaxdayda ku wareegayey. Sheekadii wiilkii Kunta Kinte ubucda u ahaa ee buuggii caanka ahaa ee Xididdo: Qiso qoys Ameerikaan ah (Roots) ee akhriska uun (theory) igu ahayd baan si la taaban karo halkay ka bilaabatay u taaganahay. Haddaan in yar iskiin baro ama ku xasuusiyo Kunta Kinte, wuxu ahaa wiil Afrikaan madow ah oo ku koray dhul iyo dhaqan uu leeyahay oo dhinac walba ka dhammaystiran, isaguna raalli ku ahaa, dadkiisuna raalli ka ahaayeen. Noloshaasi waxay ka jirtay meel ku aaddan dhulka hadda loo yaqaan Gambiya iyo Senegaal. Kunta Kinte wuxu u taagan yahay ruux kasta oo Afrikaan ah oo isagoo nabad iyo caano ku seexday oo ku waabariistay ay soo martay mahadhaddii addoonsigu. Waa la qafaashay oo silic iyo saxariir lagaga tallaabiyey badweynta Atlaantikada. Ka sheekayn mayno maanta kadeedkii uu la kulmay intuu jidka ku sii jiray iyo intuu cimrigiisa ku dhammaysanayey beeraha hawsha adag ee Ameerika isagoo sidaa ay tahay maalin kasta oo noloshiisa ka mid ah isku deyayey inuu maruun xorriyadiisa helo oo maskaxda iyo addimadaba adeegsanayey hase yeeshee markasta ku guul darraysanayey. Waxa laga yaabaa inay tafiirtiisii maanta yihiin kuwa madowga ah ee ku soo guryo noqda Afrika iyo meelo Elmina Castle ka mid tahay si ay silsiladoodii abtirsiintooda u raadiyaan, halka qaarkoodna ay maanta ku faanaan inay Ameerikaan yihiin iyagoo ka qayb qaata ololayaal badan oo lagu waxyeellaynayo dad aadami ah, si la mid ah si awoowyaashood iyo ayeeyooyinkood loo waxyeelleeyey.

Waaban is illaawee aan Elmina Castle oo aan dhex taaganahay dib ugu soo noqdee, halkani waa qolkii dumarka, kan kalena waa kii ragga, labada midkoodna daaqad hawadu ka soo gasho ma leh, mid walba waxa u daloosha meel yar oo u furan maqsinka kaydka rasaasta, hawada keliya ee soo gashaana waa urta baaruudda. Qolka dumarka waxa dhexdiisa ku qotonta bir adag oo silsiladi ugu xidhan tahay. Dumarka oo dhan waa la isku xidhxidhaa, meel uma baxaan, halkaas baa dhiig iyo dheecaanba kaga yimaaddaa, waa la macaluuliyaa oo way tabar gabeen. Qolka hortiisa waxa ah daarad bannaan oo dusha ka dadan oo dabaqa ka sarreeya ay ku yaallaan qolka hurdada iyo fadhiga ee badhsaabka oo ay ka soo horjeeddo kaniisadda uu ku cibaadaysto. Berendaha waxa isa soo taaga badhasaabka, markaasaa dumarka loo soo saaraa daaradda qolka hortiisa. Inta badhasaabku hoos u soo eego daaradda isagoo berendaha qolkiisa dabaqa labaad saaran ayuu dumarka isha mariyaa oo mid ka mid ah ii soo saara yidhaa. Inta gabadhaas loo soo maydho oo la soo nadiifiyo ayaa loo keenaa badhasaabka oo uu la tagaa qolkiisa hurdada.

Qolka ragguna waa la mid kaa dumarka oo ciqaab taa la mid ah bay la kulmaan. Dadkaas la soo addoonsaday waxay isku dayaan inay dagaallamaan si ay xorriyaddooda u helaan ilaa ay ka tabar gabaan, garaacista iyo karbaashkuna waa mid aan tudhaal lahayn oo si joogto ah ugu socda.

Waxa kale oo jira qol aad u yar oo aan isna wax daaqado ah lahayn oo dhako iyo laba lafood oo isweydaarsan oo geeri sheegayaa ku dhejisan yihiin albaabka dushiisa. Qolkan waxa lagu xereeyaa oo lagu ciqaabaa geesiyada dagaalyahannada ah ee ka horyimaadda awaamiirta gumaysiga marka la soo qabto. Qolkaas baa lagu tuuraa, cunno lama siiyo, halkaas bay ku lafoobaan oo ku uraan, ku kasta oo la soo qabtana waa lagu sii daraa. Markay dhintaan maydkooda askarta ayaa qaadi jirtay oo badda raacin jirtay si ay digniin ugu noqoto kuwa kale ee laga yaabo inay jidkooda maraan.

Ta murugada lahayd waxay ahayd ee qolkaa ka dhici jirtay qofkii oo sii dhimanaya oo aanad waxba u qaban karin oohin mooyee;marmar maydkii oo qudhmay baa meesha lagu dayn jiray oo kuwa kalena kula xidhnaan jireen.

Hadda ogow geesiyadaa soo qabashadooda iyo guud ahaan soo qabqabashada Afrikaanka la addoonsanayo ee la dhoofinayo reer Yurub keligood may awoodeen inay afrikaanka oo dhan u soo qabqabsadaan addoonsi, waxase ka qayb qaata caaqillada iyo dhuuni qaatayaal badan oo Afrikaan ah. Caaqillada waxa la siiyaa hadiyado looga keeno Ameerika iyo Orobbo oo ay ku beddeshaan dadkooda xoogga ah, caaqil kasta tiro go'an baa laga sugaa. Sidoo kale waxa jiray habab kala duwan oo ay u qabsanayeen, waxay heshiis la gelayeen Afrikaanka kale, Afrikaankuna iyaga ayaa isa soo qaban jiray oo iska iibin jiray addoonsadaha.

Waxa kale oo ka qayb qaatay dagaalkii dhex mari jiray qabaa'ilka oo gumaystayaashuna sii xoojiyeen. Waayadaas waxa caado ahayd marka qabiil laga adkaado ee maxaabiis laga qabto inuu bixiyo qabiilka laga adkaadaa xoolo joogto ah sannad kasta oo siiyo qabiilkii ka adkaaday. Haddii markaa qabiilkaa laga adkaaday xoolahaa bixin kari waayo wuxu dagaal ku qaadayey qabiil ka tabar yar oo oo isna xoolaha baadda aha ee sannadlaha ka qaadi jiray, haddii qabiilkaa kale ee laga adkaaday uu isna awoodi waayo inuu iska bixiyo ku ka sii tabar yar buu dagaalka ku qaadi jiray sidaas baanay meertadu u socon jirtay. Tani waxay ka mid ahayd sababihii u fududaysay inuu gumaysigu helo addoon.

Marmar qofka waxa laga soo qaban jiray meel ilaa 300km badda ka fog, waa la soo lugaysiin jiray, alaab culusna lagu soo raran jiray ilaa bilo ayey xeebta u soo socon jireen, way cagaagnaayen, maro yar oo ay cawrada ku maraan ayaa dhar u ahayd. Kuwa tabar darreeya ama xanuunsada kaynta ayaa dugaagga looga tegi jiray

Waxa iyana xusid mudan in Afrika ahayd oo lahayd cimilo u daran dadka caddaanka ah noloshooda oo ay u dhiman jireen xanuunno duumadu ka mid tahay. Xeebaha afrikada galbeed waxay ku can baxeen magaca ah xabaashii dadka cad. Maadaama xaaladaa ba'an ay la kulmi jireen waxay u arkayeen marka Afrika loo diro in lagu ciqaabayo, markaa la yaab may ahayn in inta badan askarta Afrika loo soo diraa ay ahaayeen dambiilayaal ama calooshood u shaqaystayaal iyo kuwa nolosha ka dhacay si loogu soo rabbeeyo sababtoo ah qofka muwaadin hagaagsan ah ee nolol dalkiisa ku haystaa ma iman jirin inkastoo uu qayb ka ahaa ganacsiga

addoonsiga. Taasi waxay keentay in dadkaasi noqdaan kuwo naxariis darran oo maxaabiista ay soo qabtaan ee iibinayaan aanay si aadaminimo ula dhaqmin.

Ragga caddaanka ah ee ka ganacsada addoonta qaarkood may jeclayn inay dumarkaAfrikaanka ah ku fara xumeeyaan sidaa darteed way guursan jireen markaana waxay guryo uga dhiseen meel aan qalcadda/qasriga ka fogayn. Carruurtaa iska dhalka ah waxa la keeni jiray qalcadda si wax loo baro. Carruurtan badankoodu markay waaweynaadaan waxa ay noqon jireen Biriij isku xidha reer Yurub iyo Afrikaanka.

Carruurtani waxay isku arkayeen kuwo ka sarreeya Afrikaanka kale sababtoo ah waxay ahaayeen kuwo wax la baray, cunno fiican iyo guryo la siiyey ammaankooduna sugan yahay, waxana loo bixiyey magacyo Yurubiyaan ah.


Qol yar oo kaa halyeeyada lagu xabaal nololin jiray ku xigay ku xigay waxa lagu hayn jiray Yurubiyaanka sikhraama ama dhaqan xumaada. Muddo ayaa halkaa lagu hayn jiray waana la sii dayn jiray. Maadaama qolka loogu talo galay yurubiyaan, wuxu ahaa mid daaqado hawo ka soo gasho leh.

Intaan maxaabiista la keenin qolalka waxa lagu samayn jiray baadhitaan lagu samaynayo si loo ogaado da'dooda. Marmar bir baa afka laga gelin jiray si loo qasbo inuu afka furo oo ilkihiisa looga garto da'diisa.Waa la karbaashi jiray si marka uu xanuunka la booddo loo ogaado xooggiisa. Maxaabiista waxa jeelka lagu hayn jiray bil ilaa laba iyadoo ku xidhan hadba sida loo helo markab meesha ka qaada. Maalintii hal mar baa waxay cunaan la siin jiray.

Dabaqyada sare waxa ahaa qolalka ay u hoydaan askarta, ganacsatada iyo wadaaddadu. Waxa qolkaa ganacsatada ku dhegganaa ka badhasaab ku xigeenka, waxana ka sii sarreeyey ka badhasaabka.

Tani waxay tusaysaa inay siday u kala darajo sarreeyaan qolalkooduna u kala sarreeyeen.Dusha sarena waxa saarnaa laba madfac oo lagu ilaaliyo ammaanka meesha.
Dhinaca woqooyi ee dhismaha waxa ahaa qolka kaydka rasaasta iyo qolka cuntada. Badhtama waxa ku yaallay kaniisadda Katooligga ee ee uu dhisay Boortuqiisku.
Barxadda ugu dambaysa waxa loo yaqaanay barxadda bisadaha oo ahayd meel lagu dhaqi jiray bisadaha oo la yidhi qanjidhada ka hooseeya dabadooda waxa ku jira walax laga sameeyo cadarka.

Waxa jira qol kale oo aad u yar oo ku yaallay xagga ugu dambaysa, halka laga galaana aad u yartahay oo leh albaab u furan badda oo Laashash lagu raro dadka ku wareejiya Maraakiibta. Qolkaas waxa la yidhaa qolka aan soo noqoshada lahayn (the room of no return), cidda gashaana dib ugama soo noqoto. Waxa weli ku qoran far af ingiriisi ah, the room of no return.Halkaas baa dadka lagu wareejiyaa markabka oo ay uga bilaabataa nolol kale oo silic iyo saxariir ah, taasoo keenta in kala badh maxaabiista addoonsigu ku dhintaan inta lagu jiro Atlantikada oo maydkooda badweynta lagu daadiyo.



*(waa albaabka laga galo qolka the Room of No Return)*

Inta badweynta lagu jiro, dadka sida looxa ayaa la isku garab raseeyaa oo la isku dul jiifiyaa markabka dhexdiisa, in badan oo ka mid ahi silic iyo darxumo ayey badda ugu le'daan, inta nolol ku gaadha halkii loo wadayna waxa sugaya nolol kale oo dhib iyo rafaad badan oo ay cimrigooda ku qaadan doonaan dhulka la magac baxay dunida cusub, dhulka dimuqraadiyadda iyo xorriyadda. Taasi waa sheeko kale oo aynaan halkan kaga geyoonayn. Waxa qofkii akhriyi karaa wax badan ka heli karaa buugga Xididdo(roots) ee aynu hore u soo sheegnay. Ma hubo in isagoo soomaali ah la helayo inkastoon xasuusto berigaan gabanka yar ahaa in sheekada buuggaasi iyadoo af soomaali loo turjumay ay ku soo bixi jirtay wargeyskii Xiddigta Oktoobar la odhan jiray ee soomaaliyadii berigaa laga akhrisan jiray.

Berigaas af soomaliga waan akhriyi kari jiray mase fahmi jirin waxa sheekadan xididdo ay ka hadlaysay, waan la yaabbanaa magacyadan qalaad ee Kunta Kinte. iyo meelaha qalaad ee sheekadu ka warramayso. Maanta haddaan heli lahaa!!! Tolow ninkii sheekadaa turjumi jiray

maanta ma nool yahay, hadduu nool yahayse halkee waayuhu dhigay, wax ma ka hayaase sheekadaas oo af soomaali ah, cid kalese ma haysaa?

Waxan sidaa u leeyahay waa sheeko adag oo turjumaadeedu adag tahay. Dadka sheekadaasi ka warramayso oo ninka qorayba ka mid yahay waa kuwa maanta Afrika dib ugu soo laabanaya ee raadinaya xididdadooda iyo halkay ka soo jeedaan. Waa kuwo ka mid noqday dhulkaa ay degeen oo inkastoo ay dib u xoroobeen, xilal sarena ka qabteen, aqoon fogna yeesheen haddana si uun uga duwan, si uun uga faquuqan dadka caddaanka ah ee ay la nool yihiin. Hadda xorriyaddoodu way soo dhowaatay oo xorriyaddii Afrika uun bay la waqti yihiin oo waa lixdameeyadii, waxanan garanayn uun inay sida Afrika gumaysi cusub galeen, waxanse filayaa inay dhaamaan oo inkastoo aan la jeclayn haddana waa rag ismuujyey iyagoon cidna necbayn, waayo nacaybku nacayb uun buu dhalaa, qofkuna hadduu xuquuqdiisa soo dhacsado waxa habboon inuu ciddii dulmiyi jirtay saamaxo oo walaalnimo u muujiyo taasi waxay waxtar u tahay kii wax dulmiyi jiray oo ku waano qaata caqli laawaha mooyee. Maahmaahaha soomaalida kuwa ugu wanaagsan waxa ka mid ah rag walaal wuxu ku dhaamo la waa.

Laba sano kadib oo iyana ku beeggan isla bisha July 2007 waxan tegi doonaa suuqii adduunta ee Sansibaar ee isna Afrikaanka laga dhoofin jiray, waa suuqa furan ee addoonsiga ee adduunka ugu weyn. Hadda xilligan aan kuu warramayaa waa 2008, garan maayo waxan intaa la aammusnaa ee u hadli waayey ee ugu warrami waayey soomaalida aan wax badan kala socon wixii Afrika soo maray, soomaalida laandheeraha iyo Carabta isku haysata ee isu aragta inay Afrikaanka kale ka duwan yihiin, soomaalida aqoonta ay Afrika iyo asalkooda u leeyihiin ku yar tahay ee siday geelooda isaga dhaqanayeen magaalooyinka u soo guuray.

Waxan ka maqli jiray soomaalidii khaliijka u dhooftay oo hiifaya walaalahooda Carbeed ee muslinnimadu ka dhexayso marmarna sheegta inay la qabiil yihiin. Soomaalidaa khaliijka tagtay aad bay uga caban jireen Carabta, waxay sheegeen in Carabtu qof kasta oo madow addoon u haystaan oo ereyga cabiid ku isticmaalaan qofkaa madoobi diin kastaba ka haystee.

Hoteelkii aannu joognay Sansibaar oo magaciisu ahaa Mason oo aannu maalintaa kula kulmaynay wasiirka dawlad wanaagga ee Sansibaar waxa gidaar meel dhexe oo dabaqa sare ah ku yaalla magaca Tippu Tip. Magacaasi markasta oon meesha maro indhahayga wuu ku dhacayey wax macno ahna iima samaynayn ilaa uu saaxiibkay Leon oo u dhashay dalka Jamhuuriyadda Dimuqraadiga Kongo intuu farta ku fiiqay si cadhaysan u yidhi, ”ninkaasi dhibaato badan buu u gaystay dadkayga, dad badan buu ka soo kaxaystay Kongo oo ka iibiyey Carabta”.




*(Xasan & Mr. Leon)*

Haaaa..Tippu Tip…immikaan dib u eegay oo higgaadiyey xuruuftii uu ka koobnaa. Waa Tippu Tip.
Tippu Tip wuxu ahaa ninkii ugu caansanaa kuwii ka shaqaynayey ka ganacsiga addoonsiga Sansibaar, sawaaxili aad loo tixgeliyo oo aad ugu dhow suldaan Sayidkii xukumayey Sansibaar buu ahaa. Ma maqashay daarta Siciid Barqash ee ku taal Muqdisho? Suldaan Sayid waa ninkaa Siciid Barqash aabbihii. Tippu Tip isaga ayaa masuul ka ahaa in awoodda iyo saamaynta Suldaan Sayid aad u fiddo. Intii suldaanku maamulayey hawlaha Sansibaar ee danaha carbeed ka difaacayey faragelinta ingiriiska, Tippu Tip wuxu samaystay Imbaraadooriyad weyn taasoo ugu dambayn keentay in 2 milyan km oo Afrika ah uu suldaanku taladeeda gacanta ku dhigo oo waxa la odhan jiray marka durbaanka Sansibaar laga garaaco ayaa afrika qoob ka ciyaartaa (jaastaa).

Aniga iyo Leon iyo soddomeeyo kale oo Afrikaan ah oo aanu wada soconnay waannagan dhex taagan suuqii ka ganacsiga aadamiga ee Sansibaar. Waanagan qolalkii cidhiidhiga ahaa ku jirna ee silsiladihii dadka surka lagaga xidhayey qoorta la galnay ee sawirro iskaga qaadayna bal inay xusuus u noqoto kuwii aannu ka nimid iyo ubadkayaga .

Suuqani wuxu kala mid yahay ka Gaana isna waxa laga dhoofiyaa dad laga soo qabtay qaaradda Afrika, wuxu kaga duwan yahay ka Gaana isaga dadka addoonta ka baayacmushtarayaa maaha

reer Yurub waase Carab Muslin ah, lama gaynayo Yurub iyo Ameerika waxase la geynayaa dhul Carbeed, Hindiya iyo Shiine. Afrikaan cid waliba waa u col, gaar ahaanna Afrikada madow ee saxaraha ka hoosaysaa carab iyo Cajamiba way u gacan gashay, Afrikada Woqooyi iyada waxa badbaadiyey islaamka markuu soo galay oo aan oggolayn in dadka la addoonsado. Sidaa ay tahay Carabtii muslinka ahayd waa tan ka ganacsanaysa Afrikaankii madoobaa.

Dhulkan Afrikada bari ee xeebaha badweynta Hindiya ee Sansibaar hormoodka u tahay, addoonta waxa markii hore loo adeegsanayey inay guraan fool maroodiga oo ahaa badeecad aad looga jecel yahay ilaa shiinaha.Laakiin qarnigii 18aad ayuu aad kor ugu kacay suuqa addoontu oo sannadkii 1750 ilaa 3000 oo qof baa la dhoofiyey.



*(waa halkii lagu xidhi jiray dadka lagu kala iibsanayo suuqa addoonta ee Zanzibar)*

Sheekooyinka murugada leh ee la xidhiidha sida Carabtu addoonta ula dhaqmaysay waxa ka mid ahaa inta silsilad la isugu xidho oo harqoodkii dibida oo kale qoorka lagaga xidho ayaa lagu rari jiray fool maroodi ilaa xeebta ay ka geynayaan. Haddii ay tabar darro la socon waayaan bakhtigooda ayaa cidlo lagaga tegi jiray;haddii qof dumar ahi ilme haysato dhabarka ayey ku wada qaadi jirtay ilmaha iyo xamuulka, hadday daasho oo socon kari weydo ilmaha ayaa laga dejinayey oo la dilayey.Jidadka safarku maro waxa ka buuxay maydka addoonta socon weyday.Marka addoonta markabka loo saaro ilaa Sansibaar sagxadda ayaa lagu rasayn jiray ilaa qaar neef qabatow u dhintaan. Ka xanuunsada waa laga tuuri jiray markabka. Cantoobo bariis ah baa la siin jiray in badanna macaluul bay u dhiman jirtay. Marka dekedda la keeno Carabtu waxay bixin jireen cashuurta soo dejinta addoonta sidaa darteed addoonka u eg inaanu sii noolaan karin badda ayey ku tuuri jireen.

Markay suuqa yimaadaan addoonta waa la nadiifin jiray oo iib loo diyaarin jiray, saliid la marin jiray oo loo labbisi jiray. Kuwa iska leh ayaa markaa suuqa dhex marin jiray oo naadin jiray qiimaha, kuwa iibsanayaana waxay baadhi jireen muruqooda, ilkahooda iyo indhahooda. Marka la iibsado markale ayaa adoonta la saari jiray maraakiib markan u socota dhulalka Carabta, Hindiya ama Shiinaha.

Ganacsigii addoonta waxa ugu dambayn la joojiyey oo sharci darro laga dhigay Sansibaar 1873kii markaas oo suuqii addoonta ee weynaana la xidhay. Laakiin dhibkii wuxu ku hadhay maroodigii ilaa ugu dambayn la joojiyey ka ganacsigii foolka maroodiga 1980 si bal ugu yaraan cidhibgo' looga nabadgeliyo.

Mar kale ma u muuqataa in dullaankii soo fool leeyahay…waxay yidhaahdaan taariikhdu way isa soo celisaa, waxase ay intaa ku daraan qofka liita ayey sidii hore ku soo martaa...maanta reer galbeed waabay ka raysteen gumaysigii dadkay xoogga ku haysteen ee ciidanku kaga dhiman jiray...maanta maskax iyo caqli bay ku haystaan...uma baahna inay xoog markale isticmaalaan...laakiin hadday ka fursan waayaan oo Afrikaan firfirleeyo maanta ayey ka hub iyo cudud badan yihiin…Afrikaankuna ka liitaa...dantu waxay ku jirtaa khayraadka Afrika ha la wada isticmaalo oo qaaradda dhexdeeda yaan lagu isticmaaline Ameerkika iyo Yurub ha lagu isticmaalo… Afrika dhexdeeda ha lagu baahnaado, ka Afrikaanka ah ee doonaya inuu dhergo ama khayraadka qaaraddadiisa wax ka dhadhamiyo waa inuu iskaga tago Afrika oo uu tago halka khayraadka Afrika lagu isticmaalayo...haa waa inuu ka daba tago haddii kale waa inuu ku macaluulo halkuu ku dhashay…weliba si uu uga daba tago waa inuu barto afafka halkaa lagaga hadlo iyo dhaqankooda oo dhaqankiisii ku tilmaamo mid liita oo laga tegay... waa inuu cambaareeyo oo caayo halkuu ku dhashay... waa inuu isku arko inuu ka sarreeyo kuwo la dhashay ee iyagu awoodi waayey inay khayraadkoodii ka daba tagaan ee Afrika baaqi ku ah.

Anigaygani waa inaan iskaga tago halkan mar haddii laxdii gorodda madoobayd, geelihii halka kurus lahaa iyo dibigii tuurta lahaa badda laga tallaabiyey oo hilibkooda halkaa lagu cuno...mar haddii kii geela raaci jiray iga hor tegay oo markuu gegida diyaaradaha ka soo dego yahay weli siraata...maxaan ka qaban meesha!!

Haa...wiilka Afrika horuu isku dhigtay oo u seexday...intii qayrkii dhibbanaa ee barafka iyo qabowga nolosha kula hirdamayey ee baahidu wax baraysay isagu wiil Afrikaan wuxu haystay cimilo wanaagsan, aan kulayl wax dhiba iyo qabow midna ahayn, uma baahnayn hoy uu galo, uma baahnayn hu' uu xidho, uma baahnayn cunto uu la soo baxo...midhaha kayntiisa iyo ugaadha uu dabanayo ayaa ku filnaa...uma baahnayn inuu maskaxda tuujiyo oo aqoon ka soo maroojiyo...maskaxdiisa oo dihin oo sidii ay u dhalatay ah oo bacdii ku taal buu cimriga intii Ilaah ugu talo galay ku qaadanayey. Hurdo dheer iyo raaxo ayuu isaga jiray ilaa ninkii barafka ka soo mudhbaxay ee noloshu tababartay uu halkiisa ku soo doontay oo sida xoolihii uu dhaqanayey isaga u dhaqday.

Maanta guriga qalcadda ah ee **Elmina Castle** wuxu jiraa 526 sano. 155 sano waxa haystay Boortuqiis, 235 sannadoodna Dutch, Ingiriiskuna wuxu haystay 85 sano, inta soo hadhay oo ah 51 sano wuxu ku jiray gacanta Gaana oo uu weli ku sugan yahay.